

QIIMEYNTA SINNAANTA SSA IYO TAXLIILINTA BAAHIYAHA

Waaxda-maamulka	Adeegyada Caruurta
Goobta Adeega	Waxbarasho
Adeega/siyaasada/shaqada la qiimeynayo	Wakhtiga la qorsheeyay in la xiro Dugsiga Hoose ee Broadwater
Tuulooyinka ama degmooyinka uu adeegan ama siyaasadan taabaneyso	Wandsworth
Shaqaalaha ku lugta leh horumarinta EINA	Adam Wells
Taariikhda ay ansixinayaan Kooxda Sinnaanta ee Maamulka (hadii ay suuragasho ayadoo ay la eegayo duruufaha)	TBC
Taariikhda la Ansixinayo Siyaasada Dibna uu u eegayo Maamulaha Dhamaan EINA waa in Siyaasadu Ansixisaa oo u Dib u eegaa Maamulka.	TBC (Diseember 2022)
Taariikhda loo soo gudbinayo Gudida Maamulka	TBC

1. Soo koobid

Ka dib tixgelin taxaddar leh, Golaha Wandsworth wuxuu qaatay go'aanka adag si uu ugala tashado soo jeedinta lagu xirayo Dugsiga Hoose ee Broadwater Muddada Xagaaga ee 2023, iyadoo la doonayo in dib loogu sameeyo goobta Dugsiga Baahiyaha Gaarka ah. Hadii furitaanka Dugsiga Baahiyaha Gaarka ah ee Paddock la ansixiyo, tani waxa ay keenaysaa in la helo ku dhawaad 190 goobood fursadna ka helaan ardayda qaba baahiyaha gaarka ah taas oo ah arin ay degmadu aad ugu baahantahay.

Soo jeedintan waxa horseed ka ah hamigayada wadajirka ah ee carruurta leh SEND si loo daboolo baahiyahooda gudaha, iyaga oo ku dhowaynaya qoysaskooda iyo asxaabtooda iyo baahida loo qabo in la ilaaliyo nidaam dugsi oo waara.

Iyadoo ay ugu wacan tahay kor u kaca baahida boosaska khaaska ah in aanay jirin awood ku filan oo siin karta dugsigeena gaarka ah ee jira, waxaana qasab nagu ah in aanu boosas ka sameyno meel ka baxsan Wandsworth, inta badan dugsiyada madaxa banaan. Hadda sidaas darteed, qaar badan oo ka mid ah dhallinyaradeenna SEND waa inay u safraan masaafo dheer si ay u dhigtaan dugsiyo ka fog deegaan kooda. Tani kuma jirto kharash lacageed oo keliya, laakiin sidoo kale, si aad u weyn, carruurta laftooda, qoysaskooda, iyo dugsiyadeyna maxalliga ah.

Tani waxay u baahan tahay takhasus dheeraad ah bixinta SEND waxay ku soo beegantay hoos u dhaca tirada ardayda ee dugsiyada hoose dhexe ee London oo dhan, oo ay ku

jiraan Wandsworth. Tani waxaa sababay qoysas ka tagay magaalada natiijada ka dhalatay Brexit iyo masiibada waxayna keentay in la kordhiyo boosaska dugsiga hoose.

Si wax looga qabto labadan arrimood, waxaa nalooga baahan yahay inaan qaadno tallaabo adag oo aan si halabuur leh u fekerno si aan u hubinno awoodda SEND takhasuska dheeraadka ah ee lagama maarmaanka ah, iyo sidoo kale yareynta boosaska dheeraadka ah ee dugsiyada ee qaybta hoose. Soo jeedinta ah in dib looga faaideysto goobta waxbarashada ee Broadwater waa in la xaliyo labada u jeedo. waana muhiim in gudida ay si fiican u fahmaan in u jeedada kaliya loo qoray codsiga iyo soo jeedintan ay arinta tahay, wax xidhiidh ahna lama lahan soo jeedinta codsigan tayada wax dhigista, shaqaalaha iyo hogaanka iskuulka.

Waxaa naga go'an, iyada oo loo marayo xaalado wadatashiga, inaan dhageysano oo aan ku dhaqaaqno aragtida iyo dareenka kuwa ay khuseyso, iyo inaan bixinno faahfaahinta iyo dammaanadda si loo yareeyo khatarta isbeddel kasta oo mustaqbalka ah. Waan fahamsanahay in soo jeedintani ay si lama-huraan ah u saameyn doonto carruurta, waalidiinta iyo macalimiinta bulshada dugsiga Broadwater laakiin sidoo kale waxaan aqoonsannahay in aysan jirin wax soo jeedin ah oo weligeed heli doonin taageero caalami ah. Go'aamadan adag waxa loo qaatay danta guud ee dhammaan carruurta iyo qoysaska Wandsworth.

EINA kan waxaa la dareemaya dugsigan la xidhaayo ee la soo jeediyay ay saamaynayso ardayda hadda dhigata dugsiga. Maadaama ardayda BME iyo ardayda leh EAL ay si xad dhaaf ah u matalaan marka loo eego tirakoobka 2011 ee tirada ardayda ee ardayda tani waxay si xun u saameyn kartaa ardayda BME. Tirada ardayda helaya FSM ee Broadwater way ka sarraysaa celceliska degmada. Xogta IDACI waxay sidoo kale tilmaamaysaa in qoysaska ku jira saddexda kooxood ee ugu xasaasisan ay si xad dhaaf ah uga dhex muuqdaan dadweynaha dugsiga. Sidaa darteed, soo jeedintu waxay si xun u saamayn kartaa kooxahan nugul ee carruurta.

Si loo yareeyo saamaynta ay ku yeelanayso codsabayaasha maxaliga ah, koonsilku waxa uu sidoo kale isku hubiyay in ay jiraan meelo ku filan aagga deegaanka ee ardayda hadda iyo tirada ardayda mustaqbalka. Soo jeedinta waxa ay xidhiidh la leedahay soo jeedin kale oo dib looga isticmaalayo goobta dugsigao laguna xaqiijinayo waxyaalaha dheeriga ah ee SEND. taasi oo dhalinaysa kuna yeelanaysa saameyn wanaagsan ardayda SEND.

EINA kan waa la cusboonaysiiyay ka dib natiijoyin ka soo baxday wada-tashigii hore ee daabacaadda. Macluumaad dheeraad ah ayaa lagu daray Ardaydu inay helaan cunto dugsiyada oo bilaash ah iyo Dakhli la'aan saamaynaysa xogta carruurta (IDACI) taasoo tilmaamaysa wax la'aanta iyo sidoo kale ardayda Ingiriisida luqad dheeraad ah u ah.

Soo jeedinta waxay ku xiran tahay la tashi sharci ah oo dheeri ah EINA waa laga cusboonaysiin doonaa wixii natiijooyin dheeraad ah ee tan ka soo baxa.

2. Caddaynta ururinta iyo ka qaybgalka

a. Cadeyn nooce ah ayaa loo isticmaalay qiimeyntan? Tusaale ahaan, xogta qaranka, xogta maxaliga ah ayadoo loo sii marayo Datarich ama Data Wand.

Cadeyn	Ilaha
Xogta da'ada	Tirakoobka dugsiga ee Aktoobar 2022. Xogta diiwaangalinta gudida
Naafada	Tirakoobka dugsiga ee May 2022. Xogta SEND ee gudida
Jinsiga lab ama dhegid	Tirakoobka dugsiga ee May 2022.
Jinsiyada/qoomiyada	Tirakoobka dugsiga ee Janaayo 2022. Xogta tirakoobka qaranka ee 2011 (ayadoo loo sii marayo Xogta Wand)
Diinta iyo waxa uu qofka aaminsan yahay	Xogta tirakoobka qaranka ee 2011 (ayadoo loo sii marayo Xogta Wand)
Wax la'an	Tirakoobka dugsiga ee Janaayo 2022
In lagu xanaaneeyo carruurta iyo carruurta loo yaqaan Daryeelka Bulshada	Tirakoobka dugsiga ee Aktoobar 2022

b. Kumaad la tashatay oo aad la falgashay qayb ahaan qiimayntaada?

Soo jeedintu waxa ay ku xidhnaan doontaa laba la-tashi: la tashi ka hor daabacaadda iyo muddo 4-toddobaad oo dheeraad ah ka dib daabacaadda soo jeedinta sharciga ah. EINA kan waa la cusboonaysiiyay ka dib faallooyinka la helay iyada oo qayb ka ah la-tashiga hore.

3. Taxliilinta loo baahan yahay

Saamaynta ay ku sifayn karto kooxdaan deganeyaasha ah iyo heerka la qaaday si loo saamayo loona hormariyo sinnaanta, kala duwanaanshaha iyo ka mid noqoshada

Kooxda la ilaaliyay	Natiijoyinka
Da'da	Dugsiga wuxuu boosas siiyaa dhalinyarada da'doodu u dhaxeeyso 3 ilaa 11. Laga bilaabo 4 Diisembar 2022, dugsigu waxa uu leeyahay 108 carruur ah oo ku jira Sanadaha Soo dhawaynta ilaa 5 kuwaas oo ay saamayn doonto xidhitaanka Dugsiga Hoose ee Broadwater dhamaadka sanad dugsiyeedka 22/23. Shaqada diyaarinta dheeradka waxay soo jeedinaysaa ku filnaanshaha boosaska dugsiyada deegaanka ee leh 253 boosas oo ka banaan 0-1mile guriga ilaa masaafada dugsiga iyo 591 boosaska banaan ee 0-1.5miles guri ilaa dugsiga inta u dhaxaysa Rec-Sano 5.
Naafada	6 (4%) caruurta Broadwater waxa ay qabaan EHCP 1 ilmo oo kaliya ayaa ka hooseeya qiimaynta. 4 ka mid ah 6 caruurta leh EHCP waxa ay leeyihiin walaalo, waanan tixgalin doonaa marka

	<p>aan wadno qorshaha diiwaangalinta. Dookhyada dugsiga ayaa horay loogala hadlay qoysaskan waxayna ku faafen dugsiiyo kala duwan. Kaliya 1 waalid ayaa codsanaya dugsii aanan u dhoweyn.taasi waxa ay saameyn yar ku yeelanaysaa gaadiidka.</p> <p>Marka la eego tirakoob la sameeyay May 2022,sidoo kalena lagu daro 14% ardayda dugsiga ayaa helay taageerada SEN. Qeybta ardeyda ee qabta EHCP islamarkaana heshay taageerada SEN waxa ay la mid yihiin dhamaan ardeyda dugsiyada ee ku yaala Wandsworth kuwaas oo ahaa 4% ilaa 14% bishi May.</p>																		
Jinsiga lab ama dhegid	<p>Marka loo eego Tirakoobka Dugsiyada Maarso 2022, muuqaalka hadda dugsigu waa 52% dumar ah iyo 48% rag ah. Tani marka la barbar dhigo celceliska degmada ee ardayda hablaha ah ee dugsiyada hoose dhexe oo ah 50% iyo lab 50%.</p>																		
Dib u magacaabida jinsiga	<p>N/A</p>																		
Guurka iyo nolol-wadaaga rayidka ah	<p>N/A</p>																		
Uurka iyo umusha	<p>N/A</p>																		
Jinsiyada/qoomiyada	<p>Janaayo 2022 qeybinta la qeybiyay qowmiyadaha ay ka soo kala jeedaan ardayda dhigata Dugsiga Hoose ee Broadwater iyo dhamaan dugsiyada kale ee Wandsworth waxa ay ahaayeen sida soo socota:</p> <table border="1" data-bbox="520 1155 1390 1554"> <thead> <tr> <th></th> <th>Broadwater</th> <th>Dhamaan iskuulada hoose</th> </tr> </thead> <tbody> <tr> <td>Eeshiyaan ama Eeshiyaan Biritish ah</td> <td>38%</td> <td>16%</td> </tr> <tr> <td>Madow ama Madow Biritish ah</td> <td>15%</td> <td>17%</td> </tr> <tr> <td>Isku-jir</td> <td>12%</td> <td>15%</td> </tr> <tr> <td>Cadaan</td> <td>24%</td> <td>45%</td> </tr> <tr> <td>Wax kale</td> <td>6%</td> <td>5%</td> </tr> </tbody> </table> <p>Tani waxa ay is barbardhig ku sameyneysaa kala jwabinta qowmiyadaha ee Maamulka xaafada Tooting Broad way (Meesha uu dugsiga ku yaalo) iyo degmada Wandsworth marka la eego tirakoobka qaranka ee la sameeyay 2011 waxa ay noqotay sidan soo socota:</p>		Broadwater	Dhamaan iskuulada hoose	Eeshiyaan ama Eeshiyaan Biritish ah	38%	16%	Madow ama Madow Biritish ah	15%	17%	Isku-jir	12%	15%	Cadaan	24%	45%	Wax kale	6%	5%
	Broadwater	Dhamaan iskuulada hoose																	
Eeshiyaan ama Eeshiyaan Biritish ah	38%	16%																	
Madow ama Madow Biritish ah	15%	17%																	
Isku-jir	12%	15%																	
Cadaan	24%	45%																	
Wax kale	6%	5%																	

		Tooting Broadway Ward	Degmada Wandsworth
	Eeshiyaan ama Eeshiyaan Biritish ah	25%	11%
	Madow ama Madow Biritish ah	15%	11%
	Isku-jir	5%	5%
	Cadaan	51%	71%
	Wax kale	3%	2%
<p>Janaayo 2022, boqoleyda tirada ardayda ay qoysasku Ingiriisigu u aqoonsadeen luqad dheeri ah (EAL) ee Dugsiga Hoose ee Broadwater iyo dhammaan dugsiyada hoose ee Wandsworth.</p>			
		Broadwater	Dhamaan iskuulka hoose
	EAL	57%	41%
<p>Tani waxa ay is barbardhig ku sameyneysaa boqoleyda qowmiyadaha ee Maamulka xaafada Tooting Broadway (Meesha uu dugsiga ku yaalo) iyo degmada Wandsworth marka la eego tirakoobka qaranka ee la sameeyay 2011 waxa ay noqotay sidan soo socota:</p>			
		Tooting Broadway Ward	Degmada Wandsworth
	EAL	29%	17%
Diinta iyo mabda'a, oo ay ku jirto waxyaabaha aanad aaminsaneyn	<p>Xogtan laguma soo ururin tirakoobka dugsiyada.</p> <p>Dugsiga Broadwater waa dugsi hoose oo aan xidhiidh la laheyn dugsiyada hoose ee bulshada. Boosaska dugsiyada waxa la qoondeeyey iyada oo la isticmaalayo shuruudaha oggolaanshaha ee Koonsilka ee la daabacay ee dugsiyada bulshada iyada oo aan loo eegin caqiidada ama diinta.</p> <p>Xogtan laguma soo ururin tirakoobka dugsiyada. Si kastoo ay ahaataba tirakoob la sameeyay sanadkii 2011 ayaa lagu ogaaday in 42% dadka degan xaafada Tooting ay ahaayeen Christan. 17% waxa ay ahaayeen Muslimiin, 7% waxa ay aaminsaneeyeen diinta hindusga halka 25% ay ahaayeen dad aanan wax diimo ah rumeysneyn.</p>		
Wax la'an	<p>Janaayo 2022, tirada iyo saamiga ardayda dhigata Dugsiga Hoose ee Broadwater iyo dhammaan Dugsiyada Hoose ee Wandsworth</p>		

	<p>ee helaya cuntada dugsiga ee bilaashka ah (FSM) waxay ahayd sidan soo socota:</p> <table border="1" data-bbox="520 288 1390 412"> <thead> <tr> <th></th> <th>Broadwater</th> <th>Dhamaan iskuulada hoose</th> </tr> </thead> <tbody> <tr> <td>U qalma FSM</td> <td>21 (44%)</td> <td>4918 (26%)</td> </tr> </tbody> </table> <p>Koonsilku waxa kale uu isticmaalaa xogta Dakhli la'aanta Saameynsa Caruurta (IDACI) sida tilmaame wax u dhimi kara caruurta dugsiga. Tan waxaa lagu muujiyay celcelis ahaan waxaana sidoo kale loo kala jabiyay kooxo (1A oo ah kan ugu liita). Laga bilaabo Tirakoobkii Janaayo 2022, celceliska buundada iyo saamiga ardayda koox kasta ee Dugsiga Hoose ee Broadwater iyo dhammaan dugsiga Hoose ee Wandsworth la Hagaajiyey waxay ahayd sidan soo socota:</p> <table border="1" data-bbox="520 797 1390 1200"> <thead> <tr> <th></th> <th>Broadwater</th> <th>Dhamaan iskuulada hoose</th> </tr> </thead> <tbody> <tr> <td>Celcelinka Dhibcaha IDACI</td> <td>0.20</td> <td>0.18</td> </tr> <tr> <td>Kooxda IDACI 1a %</td> <td>10%</td> <td>14%</td> </tr> <tr> <td>Kooxda IDACI 1b %</td> <td>17%</td> <td>11%</td> </tr> <tr> <td>Kooxda IDACI 2 %</td> <td>38%</td> <td>24%</td> </tr> <tr> <td>Kooxda IDACI 3 %</td> <td>19%</td> <td>21%</td> </tr> <tr> <td>Kooxda IDACI 4 %</td> <td>15%</td> <td>15%</td> </tr> <tr> <td>Kooxda IDACI 5 %</td> <td>2%</td> <td>16%</td> </tr> </tbody> </table>		Broadwater	Dhamaan iskuulada hoose	U qalma FSM	21 (44%)	4918 (26%)		Broadwater	Dhamaan iskuulada hoose	Celcelinka Dhibcaha IDACI	0.20	0.18	Kooxda IDACI 1a %	10%	14%	Kooxda IDACI 1b %	17%	11%	Kooxda IDACI 2 %	38%	24%	Kooxda IDACI 3 %	19%	21%	Kooxda IDACI 4 %	15%	15%	Kooxda IDACI 5 %	2%	16%
	Broadwater	Dhamaan iskuulada hoose																													
U qalma FSM	21 (44%)	4918 (26%)																													
	Broadwater	Dhamaan iskuulada hoose																													
Celcelinka Dhibcaha IDACI	0.20	0.18																													
Kooxda IDACI 1a %	10%	14%																													
Kooxda IDACI 1b %	17%	11%																													
Kooxda IDACI 2 %	38%	24%																													
Kooxda IDACI 3 %	19%	21%																													
Kooxda IDACI 4 %	15%	15%																													
Kooxda IDACI 5 %	2%	16%																													
<p>In lagu xanaaneeyo carruurta iyo carruurta loo yaqaan Daryeelka Bulshada</p>	<p>Hadda ma jiraan wax xidhidh ah carruurta marka lagu diiwaan geliyey Dugsiga Hoose ee Broadwater.</p> <p>Oktoobar 2022, tirada iyo saamiga ardayda dhigata Dugsiga Hoose ee Broadwater iyo dhammaan Dugsiyada Hoose ee Wandsworth ee loo yaqaan Daryeelka Bulshada waxay ahayd sidan soo socota:</p> <table border="1" data-bbox="520 1570 1390 1727"> <thead> <tr> <th></th> <th>Broadwater</th> <th>Dhamaan iskuulada hoose</th> </tr> </thead> <tbody> <tr> <td>Oggow Daryeelka Bulshada</td> <td>9 (5%)</td> <td>288 (2%)</td> </tr> </tbody> </table>		Broadwater	Dhamaan iskuulada hoose	Oggow Daryeelka Bulshada	9 (5%)	288 (2%)																								
	Broadwater	Dhamaan iskuulada hoose																													
Oggow Daryeelka Bulshada	9 (5%)	288 (2%)																													
<p>Jihaynta galmada</p>	<p>N/A</p>																														
<p>Kooxaha oo dhan tusaale ahaan isticmaalayaasha adeegga LGBT ee da'da weyn ama ragga dhallinyarada</p>	<p>N/A</p>																														

<p>ah ee Madow, Aashiyaan iyo kuwa laga tirada badan yahay.</p>	
--	--

Nusqaamaha xogta

Nusqaamaha xogta	Sidee tan lagu xalin kara?
N/A	N/A

4. Saameynta

Kooxda la ilaaliyay	Togan	Xun
Da'da	<p>Iyada oo la raacayo Xeerka Gelitaanka Dugsiga ee qaranka, boosaska dugsiga waxa loo qoondeeyey iyada oo la adeegsanayo shuruudaha gelitaanka ee la daabacay. Isbeddellada la soo jeediyay waxay la xiriiraan carruurta iyo dhalinyarada da'da dugsiga hoose ee sharciga ah. Gelitaanka dugsiyada waa hawl ay ku shaqaynaysa qaab dhismeedka sharciga ah. Wandsworth waa maamulka oggolaanshaha dugsiyada bulshada waxaana jira qabanqaabada iyo shuruudaha gelitaanka ardayda xanaanada, dugsiyada hoose dhexe.</p> <p>Waxa jira meelo ku filan dugsiyada deegaanka oo wanaagsan sanadka oo dhan si ay u dejiyaan kooxda Broadwater 1 mile u jira gurigooda iyada oo la raacayo doorbidka waalidka. Wakhti xaadirkan, kaliya 19% oo ah ardayda isku heerka ayaa ku nool 1km oo ah gudaha dugsiga.</p>	<p>Xiritaan kasta oo dugsi oo ka dhalata baahida ilmaha u qabo inuu beddelo dugsiga waxay carqalad ku noqon doontaa waxbarashadooda. Si kastaba ha ahaatee, si loo yareeyo saameyntan waxaan kala shaqeyn doonaa shaqaalaha qorshaha kala guurka ee carruurta marka ay u guurayaan dugsi cusub oo ay ka fekerayaan fursadaha waxbarasho ee wanaagsan.</p> <p>Xiritaanku wuxuu saamayn karaa walaalaha ardayda dhigata Broadwater haddii ay damceen inay dhigtaan isku dugsi. Koonsilku waxa uu hubin doonaa in ay jiraan qodobo ku haboon arday kasta oo barokacay. Waxay hubin doonaan in doorashada waalidka iyo xaaladaha qoyska sida walaalaha la tixgeliyo marka la siinayo boosaska dugsiga si loo yareeyo saameynta qoysaska meel kasta oo suurtagal ah.</p> <p>Si loo yareeyo saamaynta ay ku yeelanayso codsabayaasha maxaliga ah, koosilku waxa uu sidoo kale isku hubiyay in ay</p>

		<p>jiraan meelo ku filan aagga deegaanka ee ardayda hadda iyo tirada ardayda mustaqbalka.</p> <p>Waalidiintu waxa kale oo ay xaq u leeyihiin in ay rafcaan u qaataan guddi rafcaan oo madaxbannaan.</p> <p>Soo jeedinta waxay ku xiran tahay la tashi sharci ah.</p>
Naafada	<p>Carruurta iyo dhalinyarada qaba baahiyaha waxbarasho ee gaarka ah iyo/ama naafanimada ayaa la siiyaa mudnaan marka la eego shuruudaha isqorista ama inay tagaan bixinta takhasuska. Habka lagu xaqiijinayo bixinta waxbarashada carruurta leh EHCP waxaa lagu maareeyaa adeegga qiimeynta baahiyaha waxbarashada Gaarka ah dhammaan dugsiyada waxaa looga baahan yahay inay qaabilaan ilmo haddii EHCP ay magacowdo.</p> <p>Soo jeedinta waxa ay xidhiidh la leedahay soo jeedin kale oo dib looga isticmaalayo goobta dugsigao laguna xaqiijinayo waxyaalaha dheeriga ah ee SEND. taasi oo dhalinaysa kuna yeelanaysa saameyn wanaagsan ardeyda SEND.</p>	<p>6 caruur ah oo ku sugan Broadwater ayaa qaba EHCP halka 1 mid oo carruurta ka mid ahna uu ka hooseeyo qiimaynta. 4 ka mid ah 6 waxa ay leeyihiin walaalo waanan tixgalin doonaa marka aan wadno qorshaha diiwaangalinta.</p> <p>Dookhyada dugsigaa ayaa horay loogala hadlay qoysaskan waxayna ku faafen dugsiyo kala duwan. Kaliya 1 waalid ayaa codsanaya dugsi aanan u dhoweyn.taasi waxa ay saameyn yar ku yeelanaysaa gaadiidka.</p> <p>14% kooxda Broadwater ee hadda ku jira taageerada SEN. Si loo hubiyo in qorshaha kala-guurka wanaagsan la sameeyey, kooxda ku darida LA waxay fududayn kartaa kulanka xil wareejinta ee SENCo hadda si ay ula wadaagaan muuqaalada dugsiyada helaya.</p>
Jinsiga lab ama dhegid	<p>Tan ug sareysa ayaa ah in caruurta loo qoondooyey goobo waxbarasho lana raaciyay Xeerka Diiwaangalinta.. Isbedelada la soo jeediyay maaha kuwo jinsi gaar ah. Meelaha waxaa loo qoondeeyay iyada oo aan la tixraacin jinsiga.</p>	<p>Midna lama aqoonsan</p>

Dib u magacaabida jinsiga	n/a	
Guurka iyo nolol-wadaaga rayidka ah	n/a	
Uurka iyo umusha	n/a	
Jinsiyada/qoomiyada	Shuruudaha oggolaanshaha, si waafaqsan xeerka gelitaanka qaranka iyo sharciga sinnaanta, ayaa loo isticmaalaa in lagu qoondeeyo boosaska dugsiga iyada oo aan loo eegin qowmiyad ama isir.	<p>Xidhitaanka dugsiga la soo jeediyay in ay saamaynayso ardayda hadda dhigata dugsiga. Maadaama ardayda BME iyo ardayda leh EAL ay aad ugu badan yihiin ardayda ardayda, tani waxay si xun u saameyn kartaa ardayda BME iyo ardayda leh EAL.</p> <p>Si loo yareeyo saamaynta ay ku yeelanayso codsabayaasha maxaliga ah, koonsilku waxa uu sidoo kale isku hubiyay in ay jiraan meelo ku filan aagga deegaanka ee ardayda hadda iyo tirada ardayda mustaqbalka. Waxa jira meelo ku filan dugsiyada deegaanka oo wanaagsan sanadka oo dhan si ay u dejiyaan kooxda Broadwater 1 mile u jira gurigooda iyada oo la raacayo doorbidka waalidka. Wakhti xaadirkan, kaliya 19% oo ah ardayda isku heerka ayaa ku nool 1km oo ah gudaha dugsiga.</p> <p>Waalidiintu waxa kale oo ay xaq u leeyihiin in ay rafcaan u qaataan guddi rafcaan oo madaxbannaan.</p> <p>Soo jeedinta waxay ku xiran tahay la tashi sharci ah.</p>
Diinta iyo mabda'a, oo ay ku jirto waxyaabaha aanad aaminsaneyn	<p>Xiritaankani ma keenayso hoos u dhaca tirada dugsiyada diinta ee aagga.</p> <p>Waxaa jira meelo ku filan oo ku yaala dugsiyada aan diinta</p>	

	ahayn iyo sidoo kale waxaa jira tiro dugsiyo diimeed oo degaanka ah oo loogu talagalay qoysaska doonaya meelahaas.	
Wax la'an	Shuruudaha oggolaanshaha, iyadoo la raacayo xeerka gelitaanka qaranka iyo sharciga sinnaanta, ayaa loo isticmaalaa in lagu qoondeeyo boosaska dugsiya iyada oo aan loo eegin dakhliga ama qaraabada ka maqan qoysaska.	<p>Xidhitaanka dugsiya la soo jeediyay in ay saamaynayso ardayda hadda dhigata dugsiya. Tirada ardayda helaysa FSM ee Broadwater way ka sarraysaa celceliska degmada. Xogta IDACI waxay sidoo kale tilmaamaysaa in qoysaska ku jira saddexda kooxood ee ugu wax la'aanta ay si xad dhaaf ah uga dhex muuqdaan dadweynaha dugsiya. Sidaa darteed, soo jeedintu waxay si xun u saamayn kartaa kooxahan nugul ee carruurta.</p> <p>Si loo yareeyo saamaynta ay ku yeelanayso codsabayaasha maxaliga ah, koonsilku waxa uu sidoo kale isku hubiyay in ay jiraan meelo ku filan aagga deegaanka ee ardayda hadda iyo tirada ardayda mustaqbalka. Waxa jira meelo ku filan dugsiyada deegaanka oo wanaagsan sanadka oo dhan si ay u dejiyaan kooxda Broadwater 1 mile u jira gurigooda iyada oo la raacayo doorbidka waalidka. Waalidiintu waxa kale oo ay xaq u leeyihiin in ay rafcaan u qaataan guddi rafcaan oo madaxbannaan haddii ay dhacdo in aanay suurto gal ahayn in la bixiyo dugsi ay door bidaan.</p> <p>Soo jeedinta waxay ku xiran tahay la tashi sharci ah.</p>
In lagu xanaaneeyo carruurta iyo	Shuruudaha oggolaanshaha, iyadoo la raacayo xeerka gelitaanka qaranka iyo sharciga	Xidhitaanka dugsiya la soo jeediyay in ay saamaynayso ardayda hadda dhigata dugsiya.

<p>carruurta loo yaqaan Daryeelka Bulshada</p>	<p>sinnaanta, ayaa loo isticmaalaa in lagu qoondeeyo boosaska dugsiga iyada oo aan loo eegin baahida qaraabada ee qoysaska marka laga reebo marka ay jirto baahi loo qabo in la dhigto dugsi gaar ah oo aan ahayn mid kale.</p>	<p>Saamiga ardayda loo yaqaan Daryeelka Bulshada ee Broadwater ayaa ka sarreeya celceliska degmada. Tan waxa ku jiri kara carruurta u baahan iyo carruurta hoos timaada Qorshaha Ilaalinta Ilmaha. Sidaa darteed, soo jeedintu waxay si xun u saamayn kartaa kooxahan nugul ee carruurta.</p> <p>Si taas loo yareeyo, taageerada la beegsanayo ayaa la heli doonaa iyada oo loo marayo kooxaha daryeelka bulshada ee Koonsilku.</p> <p>Koonsilku waxa kale oo uu xaqiijiyay in ay jiraan meelo ku filan oo ku yaala deegaanka oo loogu talagalay ardayda hadda iyo tirada ardayda mustaqbalka. Waxa jira meelo ku filan dugsiyada deegaanka oo wanaagsan sanadka oo dhan si ay u dejiyaan kooxda Broadwater 1 mile u jira gurigooda iyada oo la raacayo doorbidka waalidka. Waalidiintu waxa kale oo ay xaq u leeyihiin in ay rafcaan u qaataan guddi rafcaan oo madaxbannaan haddii ay dhacdo in aanay suurto gal ahayn in la bixiyo dugsi ay door bidaan.</p> <p>Soo jeedinta waxay ku xiran tahay la tashi sharci ah.</p>
<p>Jihaynta galmada</p>	<p>N/A</p>	

5. Tallaabooyinka lagu horumarinayo sinnaanta, kala duwanaanshaha iyo ka mid noqoshada

Ficil	Madaxa Hogaanka	Kama-dambaysta.
La shaqeynta SENCO si loo tixgaliyo doorashada dugsiga loona hubiyo in meel munaasib ah lagu qoro caruurta qabta EHCP.	Deborah Johnson	Juulay 23

6. La tashi dheeraad ah (waa qeyb ikhtiyaari ah - u dhameystir sida ugu haboon)

Qorshaynta la talinta	Tariikhda La-tashiga
4-todobaad matalaad sharci ah ('la tashiga rasmi ah') - hadii gudiga uu go'aansado inuu horey u sii wado la talinta dabacaada ka horeysa	Janaayo 2023